Mu'uminka Qur'aanka akhriya wuxuu la mid yahay miraha ''Utrujada'', carafteedu waa udgoon dhadhankeeduna waa fiican yahay, Mu'uminka aan Qur'aanka akhriyeyna wuxuu la mid yahay timirta, caraf malaha dhadhankeeduna waa macaan

Abii Muuse Al-ashcari-Allaha ka raali ahaadee- wuxuu yiri: Rasuulka Ilaahay- naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu yiri: " Mu'uminka Qur'aanka akhriya wuxuu la mid yahay miraha ''Utrujada'', carafteedu waa udgoon dhadhankeeduna waa fiican yahay, Mu'uminka aan Qur'aanka akhriyeyna wuxuu la mid yahay timirta, caraf malaha dhadhankeeduna waa macaan, munaafiqa Qur'aanka akhrinayana wuxuu la mid yahay geedka reexaanta, caraftiisu waa udgoon dhadhankiisuna waa qaraar, munaafiqa aan Qur'aanka akhriyeyna wuxuu la mid yahay geedka xandalada, caraf maleh dhadhankiisuna waa qaraar."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu cadeeyey nuucyada dadku ugu kala qaybsamaan akhrinta Qur'aanka iyo siday ugu intifaacayaan: qaybta 1aad: waa mu'umin Qur'aanka akhriya oo ku intifaacaya wuxuu la mid yahay miraha Utrujada la dhoho, waa geed dhadhan fiican oo udgoon oo midab qurxoon, wax tarkiisuna badan yahay, oo qofkaasi wuu ku camal falaa wuxuu akhrinaayo, adoomada Ilaahayna wax buu taraa. Qaybta 2aad: waa mu'umin aan qur'aanka akhrin, wuxuu la mid yahay timirta dhadhankeedu waa macaan urna maleh, qalbigiisa waxaa ku sugan iimaan sida timirta dhadhankeeda iyo gudaheedaba ugu sugan yahay macaanku, ee aanay u lahayn wax ur ah oo kasoo baxaya oo dadku soo uriyo; waayo malaha qofkaasi wax akhris ah oo dadku ku raaxaystaan dhagaysigiisa. Qaybta 3aad: waa munaafiq Qur'aanka akhriya, waa sida geedka reexaanta, caraf udgoon buu leeyahay dhadhankiisuna waa qaraar, waayo qalbigiisu uma suuban iimaanka, Qur'aankana kuma uusan camal falin, dadka hortiisana wuxuu isku ekaysiiyey mu'umin, carafta geedkaasi wuxuu uga eg yahay akhrintiisa Qur'aanka, dhadhankiisa qaraarna wuxuu shabahaa gaalnimadiisa. qaybta 4aad: waa munaafiqa aan Qur'aanka akhrin, isna waa sida geedka xandalada, malaha caraf, dhadhankiisuna waa qaraar, caraf la'aanta wuxuu ka shabahaa akhris la'aantiisa, qaraarkana wuxuu ka shabahaa qaraarka gaalnimadiisa, waayo uurkiisa iimaanku waa ka maran yahay, oogadiisana nafac u malaha, balse wuu dhibayaa.